Ohio Department of Health

Mike DeWine, Governor
Jon Husted, Lt. Governor

Amy Acton, M.D., MPH, Director

AMARKA AGAASIMAHA

Quseeysa: Amarka Agaasimaha ee Hoyga Ka Dhigashada Aan Joogtada ahayn ee laga dhaqangelinayo Ohio oo dhan

Aniga oo ah, Amy Acton, MD, MPH, Agaasimaha Waaxda Caafimaadka ee Ohio(ODH), iyada oo la raacayo awoodda la i siiyay R.C. 3701.04 in “loo baahdo warbixinno laga sameeyo baaritaanno iyo eegitaan uu agaasimuhu u arko inay lagama maarmaan tahay”; R.C. 3701.13 in “la sameeyo amarro gaar ah… looga hortagayo faafitaanka cudurrada faafa ama la is qaadsiiyo”; iyo R.C. 3701.14 is “loo baaro ama wax la iska weydiiyo sababta keentay cudurka ama jirrada, oo ay ka mid yihiin cudurrada la is qaadsiiyo, faafa, ama xaaladaha guud, oo tallaabo degdeg ah looga qaado xakameynta iyo joojinta waxaan **Amrayaa** waxyaabaha soo socda si looga hor tago ku fidinta cudurka COVID-19 gudaha gobolka Ohio:

1. Hoyga aan la iskugu iman waa in looga sameeyo gobolka oo dhan dadka aan awoodin inay si amaan ah iskugu karantiimaan halka ay deggan yihiin iyo dadka laga helay ama muujinaya astaamaha cudurka COVID-19.

2. Markay ahayd 20, 2020, Gobolka Ohio iyo FEMA waxay galeen Heshiiska FEMA/Gobolka ee quseeya dhammaan gobolka Ohio iyo u oggolaanaya codsadayaasha inay dalbadaan tallaabooyin badbaadin ah oo degdeg ah oo ay ku jirto hoyga aan la iskugu iman.

3. Hayadda Maareynta Xaaladaha Degdega ah ee Ohio (EMA) waa inay xaqiijiso ogolaanshaha lagama maarmaanka u ah isticmaalka maareynta hoyga aan la iskugu iman ee gobolka oo dhan iyo jiheynta labadaba Ohio EMA iyo hayaddaha maareynta xaaladaha deg-degga ah ee degmada inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu aqoonsanayo goobaha dadweynaha iyo kuwa gaar ahaaneedba, sugidda meel bannaan oo la heli karo , oo galaan heshiisyo ama heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee laga yaabo inay lagama maarmaan u tahay soo iibsashada, qalabaynta, iyo ka shaqeynta hoyga aan la iskugu iman ee gobolka oo dhan.

4. Kuliyaddaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa la faray inay u diyaariyan garoonada bannaan, dhismayaalka, iyo goobo kulliyadda ama jaamacada ee la go'aamiyay inay lagama maarmaan u yihiin oo ay habboon tahay ka dib wada tashi macquul ah oo u dhexeeya kulliyadaha ama saraakiisha jaamacadda iyo guddiga caafimaadka deegaanka, Ohio EMA, ama gobolka hay'adda maareynta xaaladaha degdegga ah si ku-meelgaar ah u isticmaal ahaan hoy aan la isugu iman oo ka hortagga faafitaanka cudurka COVID-19.

5. Kuliyaddaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa la faray inay u diyaariyan garoonada bannaan, dhismayaalka, iyo goobo kulliyadda ama jaamacada ee la go'aamiyay inay lagama maarmaan u yihiin oo ay habboon tahay ka dib wada tashi macquul ah oo u dhexeeya kulliyadaha ama

saraakiisha jaamacadda iyo guddiga caafimaadka deegaanka, Ohio EMA, ama gobolka hay'adda maareynta xaaladaha degdegga ah si ku-meelgaar ah u isticmaal ahaan hoy aan la isugu iman oo ka hortagga faafitaanka cudurka COVID-19. Ilaa inta loo arko inay lagama maarmaan u tahay hirgelinta Amarkan, heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee noocaas ah waxaa ka mid noqon kara xarun caafimaad oo gaar loo leeyahay oo ku meelgaar ah oo loo adeegsado sida kuliyaddaha ama dhismayaasha jaamacadeed ee jira, dhismayaasha, iyo goobaha, iyo kuliyad ama jaamacad noocaas ah iyo shaqaalaheeda waxaa loo qaadan doonaa inay fulinayaan waajibaadka dadweynaha iyo xaq u lahaanshaha difaacyada, iyo talaabooyinka ka yimaada, mas'uuliyadda madaniga ee lagu bixiyo R.C. *3*2743.02, R.C. 2744.02, iyo R.C. 2744.03 oo la xidhiidha isticmaalka xarun caafimaad oo gaar loo leeyahay oo ku meel gaadh ah.

6. Kuliyaddaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa sidoo kale la sii amaray inay ku soo rogaan xayiraad macquul ah isticmaalka iyo marin u helka hantida iyo goobaha kuliyadaas ama jaamacada, iyadoo la raacayo R.C. 3345.26(C), ayaa loo arkay inuu lagama maarmaan u yahaya dhaqan galinta Amarkan.

7. Iyada oo la raacayo R.C. 3345.042(C), marka laga reebo kulliyadda bulshada, kulliyadda bulshada ee gobolka, kulliyadda farsamada, ama laanta jaamacadda, hayad waxbarasho heer jaamacadeed iyo shaqaalaheeda, inta ay codsanayaan ama bixinayaan kaalmo ama gargaar iyada oo la raacayo heshiis gargaar wadaagga ah sida ku xusan amaradan, loo arko in ay qabanayaan waajibaadka guud sida lagu qeexay R.C. 2743.01 oo ay leeyihiin difaacyada, iyo kaabayaasha, qaynuunka madaniga ah ee lagu bixiyay R.C. 2743.02 Kuliyaddaha bulshada, Kuliyadda bulshada ee gobolka, kulliyadaha farsamada, laamaha jaamacadaha, iyo shaqaalaha hayadaha noocaas ah, inta ay codsanayaan ama bixiyaan kaalmo ama gargaar sida ku xusan heshiiska gargaarka wadaagga ah ee hoos imaad Amarkan, waxay heli doonaan difaacyada iyo ka caabinta mas'uuliyadda madaniga ah ee lagu bixiyo R.C. 2744.02 iyo R.C. 2744.03 waxayna xaq u yeelan doontaa dhammaan xaddidaadaha lagu dabaqi karo magdhawga dib loo soo celin karo ee hoos yimaada R.C. 2744.05.

8. Ma jiro wax Amarkan ah oo ka hor istaagaya kuliyaddaha Ohio ama kuwa gaarka loo leeyahay inay la shaqeeyaan Ohio EMA iyo/ama maamulada maxalliga ah si ay u bixiyaan hoy aan la isugu iman haddii loo baahdo. Waxay geli karaan heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee ku xusan qaybta 5502.30 ee Xeerka Dib loo Eegay.

9. Amarkani waa inuu si dhaqso leh u dhaqan galaa wuxuuna u sii socon doonaa si buuxda oo wuxuu ku dhammaan doonaa boqol iyo labaatan(120) maalmood ka dib ama waqti uu go'aamiyo Agaasimaha Caafimaadka, hadba kii soo hor mara.

COVID-19 oo ah cudur neef-mareenka ku dhaca kaasoo sababi kara cudur halis ah ama geeri, waxaa sababa fayraska SARS-CoV-2, kaasoo ah nooc cusub oo coronavirus ah oo aan horay loogu aqoon bini-aadamka oo si fudud qofba qof kale u qaadsiin karo. Fayrasku wuxuu ku faafayaa shakhsiyaadka isku soo dhawaada (in ka yar qiyaastii lix-fuudh) isagoo soo raacaya dhibcaha neefsashada kasoo baxa marka qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhiso. Waa suurtogal in shaqsiyaadku ay ku qaadi karaan COVID-19 ayagoo taabanaya meelaha la taataabto ama shay uu saaran yahay fayraska ka dibna taabta afkiisa, sankiisa ama indhahiisa.

Bishii Janaayo 23, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay diwaan-gelinta Dhacda maalmeedka Agaasimaha kaasoo ka dhigaya caabuq COVID-19 cudur laga soo tebin karo gobolka Ohio oo kujira heerka A.

Bishii Janaayo 28, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay martigelisay wicitaankii ugu horreeyay ee gobolka oo dhan iyadoo ay la xiriireen waaxyaha caafimaadka deegaanka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee la xiriira COVID-19.

Bishii Janaayo 30, 2020, Guddiga xaalada Degdegga ah ee Xeerarka Caafimaadka Caalamiga ah ee Ururka Caafimaadka Adduunka ayaa ku dhawaaqeen dillaaca cudurka COVID-19 uu yahay xaalad caafimaad oo guud oo degdeg ah oo walaac caalami ah laga qabo.

Bishii Janaayo 31, 2020, Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Alex M. Azar II, wuxuu ku dhawaaqay xaalad degdeg ah oo caafimaad oo Mareykanka ah si uu uga caawiyo waddanka daryeelka caafimaadka bulshada sidii looga jawaabi lahaa caabuqa COVID-19.

Bishii Febraayo 1, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Shabakad Feejignaan Caafimaad oo heer gobol ahsi ay u siiso waaxaha caafimaadka deegaanka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka hagitaano cusub oo ku saabsan COVID-19 iyo shuruudaha Shaqsiyaadka Baadhitaanku ku Socdo (PUI) oo dib loo eegay.

Bishii Febraayo 3, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay tababartay in kabadan 140 shaqaale si ay ugu shaqeeyaan xarun wicitaan loogu talagalay caabuqa COVID-19, inta lagu jiro xilliga loo baahan yahay.

Bishii Febraayo 5, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay bilaabeen cusboonaysiinta iyo ogeysiinta warbaahinta tirada PUI-yada Ohio maalin kasta oo Talaado iyo Khamiis ah.

Bishii Febraayo 6, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio ayaa cusboonaysiisay dhammaan kaaliyayaasha agaasimeyaasha iyo madaxda shaqaalaha ee hay'adda ee u diyaargarowga caabuqa COVID-19 iyo maqaamka inta lagu jiro kulanka golaha Badhasaabka.

Bishii Febraayo 7, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio iyo Hay'adda Maareynta Xaalada Degdegga ah ee Ohio ayaa kulmay si ay u sameeyaan qorsheyn hore oo loogu talagalay caabuqa COVID-19.

Bishii Febraayo 13, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay ku qabatay Layliga Miiska ee Baahista Cudurka si hay'adaha Gobolka ay dib ugu eegaan ficillada jawaabahooda haddii ay ka dhacdo baahid cudurka ah Ohio.

Bishii Febraayo 14, 2020, Waaxda Caafimadka ee Ohio waxay qabatey shir wicitaan oo ay la yeesheen khubaro caafimaad oo ku baahsan gobolka. Ujeeddada wicitaanku waxay ahayd in lagu wargaliyo lana hawlgeliyo bulshada daryeelka caafimaadka ee Ohio. Bandhigyo ayay bixiyeen Waaxda Caafimaadka, Hamilton County Public Health, iyo Jaamacadda Ohio State.

Bishii Febraayo 27, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio iyo Hay'adda Maareynta Xaalada Degdegga ah ee Ohio waxay warbixin ka dhagaysteen agaasimayaasha hay'adaha Gobolka inta lagu gudajiray kulanka golaha Badhasaabka ee ku saabsan u diyaarsanaanta iyo kartida suurtagalinta Xarun Hawlgallo ee Xaaladda Degdegga ah.

Bishii Febraayo 28, 2020, "Wixii soo Kordhay ee Badhasaab DeWine, Agaasimaha Caafimaadka ee Qorshaha Ka Hortagga iyo Diyaargarowga caabuqa COVID-19" ayaa loo diray tiro badan oo ururo ah oo matalaya daryeelka caafimaadka, ilkaha, daryeelka muddada-dheer, dugsiyada K-12, kulliyadaha iyo jaamacadaha, ganacsatada, gaadiidka dadweynaha, ururada caqiidada ku saleysan, ururada samafalka, iyo dawladaha hoose.

Markay ahayd Maarso 2, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio ayaa samaysay Xarun Macluumaad Wadajir ah si ay iskuduwaan isgaarsiinta caabuqa COVID-19.

Markay ahayd Maarso 5, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay martigelisay Shirweynaha Badhasaabka ee ku saabsan Diyaargarowga caabuqa COVID-19, kulan uu la qaatay Badhasaabka Gobolka, agaasimeyaasha hay'adaha golaha, guddiyada waaxyaha caafimaadka deegaanka, iyo shaqaalahooda.

Markay ahayd Maarso 6, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay furtay xarun wicitaan oo looga jawaabo su'aalaha dadweynaha ay ka qabaan caabuqa COVID-19.

Markay ahayd Maarso 9, 2020, tijaabin ay sameysay Waaxda Caafimaadka ayaa xaqiijisay in seddex (3) bukaan ay ka heleen cudurka COVID-19 Gobolka Ohio. Tani waxay xaqiijineysaa jiritaanka xaalad khatar ah oo saameyn karta caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka muwaadiniinta Ohio.

Markay ahayd Maarso 9, 2020, Wakaalada Maareynta Xaaladaha Degdegga ah ee Ohio waxay hawlgalisay Xarunta Hawlgallada Xaaladda Degdegga ah.

Bishii Maarso 9, 2020, Badhasaabku wuxuu ku Dhawaaqay Xaalad Degdeg ah ee Amarka Fulinta 2020-01D.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, Madaxa Ururka Caafimaadka Adduunka wuxuu ku dhawaaqay in caabuqa COVID-19 yahay mid adduunka ku baahay.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, baaritaan ay sameysay Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay xaqiijisay in hal (1) bukaan oo dheeri ah uu ku dhacay cudurka COVID-19 Gobolka Ohio.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, Waaxyaha Caafimaadka iyo Adeegga Ciidamada Hawlgabka ah ayaa soo saaray Amarka Agaasimayaasha Wadajirka ah ee lagu xadidayo galitaanka guryaha xannaanaynta lagu bixiyo iyo xarumaha la midka ah ee Ohio.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha si loo xaddido marin u helidda jeelalka iyo xarumaha xirida Ohio.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo lagu xaddidayay iibinta cuntada iyo cabbitaannada, aalkolada, biirka iyo waaynka in la fuliyo oo la qaato oo kaliya.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, CDC waxay soo saartay Hagidda Kumeel Gaarka ah ee kulamada dadka badan ama munaasabadaha waaweyn ee bulshada, iyagoo sheegaya in munaasabadaha noocaas ah oo ka kooban 50 ama in ka badan oo dad ah la baajiyo ama dib loo dhigo.

Markay ahayd Maarso 16, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha ee xiritaanka goobaha codbixinta doorashada koowaad ee Maarso 17, 2020.

Markay ahayd Maarso 17, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha ee ku saabsan maareynta qalliinka iyo adeegyada aan muhiimka ahayn ee ku baahsan Ohio oo dhan.

Markay ahayd Maarso 17, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha si loo xadido iyo/ama loogu mamnuuco isu imaatinka ballaaran iyo xiritaanka goobaha lagu caweeyo ee Gobolka Ohio.

Markay ahayd Maarso 19, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo lagu xidhiyo saluunada timaha, saluunada ciddiyaha, goobaha tima jarista, goobaha lagu sameeyo shaabadaha, goobaha jirka lagu dalooliyo iyo goobaha duugista jirka.

Markay ahayd Maarso 21, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo xiraya adeegyada daryeelka dadka waayeelka ah ee maalintii iyo xarumaha waayeelka.

Markay ahayd Maarso 21, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha ee xiritaanka xarumaha madadaalada qoyska iyo tukaamada internetka.

Markay ahayd Maarso 22, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo ahaa in dadka oo dhami ay joogaan guriga haddii aysan ka qaybgalayn shaqo ama nashaad muhiim ah.

Meelo badan oo ka mid ah Mareykanka waxaa ka jira “faafinta bulshada” ee fayraska sababa COVID-19. Faafinta bulshada, waxaa lagu qeexay gudbinta cudur aan la ogeyn halka uu ka bilawday, waxay ka dhigan tahay go'doomin meelo lagu yaqaano cudurka kuma filna in lagu xakameeyo faafitaanka.

Hay'adda CDC waxay sheegtay in dadku ay aad u gudbinayaan markay ugu badan yihiin astaamaha (kan ugu xanuunsan) si kastaba ha noqotee faafitaanka qaar ayaa suurtogal ah ka hor inta aysan dadku muujin astaamaha inkasta oo aysan taasi ahayn habka ugu weyn ee fayrasku u faafo.

Isu imaatinka balaaran (10 qof ama kabadan) waxay kordhisaa halista faafinta bulshada ee fayraska COVID-19.

Sidaas awgeed, si looga fogaado halis soo food leh ee ay suurtagalka tahay in fiditaan baahsanaan oo balaaran uu sameeyo cudurka COVID-19 oo u leh halis weyn oo waxyeello weyn u geysaneysa tiro badan oo dadka ka mid ah guud ahaan, oo ay ku jiraan dadka waayeelka iyo dadka qaba nidaamyada difaaca jir daciifa iyo xaaladaha caafimaad ee dabadheer, Waxaan halkan ku **AMRAYAA** in hoy aan la

iskugu imna loo isticmaali karo gobolka oo dhan dadka aan awoodin inay si amaan ah iskood isu karantiiliyaan halka ay ku nool yihiin iyo inay meel gooni ah ku hayaan dadka laga helay ama muujinaya astaamaha cudurka COVID-19. Markay ahayd 20, 2020, Gobolka Ohio iyo FEMA waxay galeen Heshiiska FEMA/Gobolka ee quseeya dhammaan gobolka Ohio iyo u oggolaanaya codsadayaasha inay dalbadaan tallaabooyin badbaadin ah oo degdeg ah oo ay ku jirto hoyga aan la iskugu iman. Hayadda Maareynta Xaaladaha Degdega ah ee Ohio (EMA) waa inay xaqiijiso ogolaanshaha lagama maarmaanka u ah isticmaalka maareynta hoyga aan la iskugu iman ee gobolka oo dhan iyo jiheynta labadaba Ohio EMA iyo hayaddaha maareynta xaaladaha deg-degga ah ee degmada inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu aqoonsanayo goobaha dadweynaha iyo kuwa gaar ahaaneedba, sugidda meel bannaan oo la heli karo , oo galaan heshiisyo ama heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee laga yaabo inay lagama maarmaan u tahay soo iibsashada, qalabaynta, iyo ka shaqeynta hoyga aan la iskugu iman ee gobolka oo dhan. Kuliyaddaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa la faray inay u diyaariyan garoonada bannaan, dhismayaalka, iyo goobo kulliyadda ama jaamacada ee la go'aamiyay inay lagama maarmaan u yihiin oo ay habboon tahay ka dib wada tashi macquul ah oo u dhexeeya kulliyadaha ama saraakiisha jaamacadda iyo guddiga caafimaadka deegaanka, Ohio EMA, ama gobolka hay'adda maareynta xaaladaha degdegga ah si ku-meelgaar ah u isticmaal ahaan hoy aan la isugu iman oo ka hortagga faafitaanka cudurka COVID-19. Kulliyadaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa la sii faryaa inay ka wada-xaajoodaan heshiis wadaagga ah ee u dhexeeya kulliyadda ama saraakiisha jaamacadda iyo guddiga caafimaadka deegaanka, Ohio EMA, ama hay'adda maareynta xaaladaha degdegga ah ee degmada si ku-meelgaar ah loogu isticmaalo sida meelaha banaan ee kuliyadda ama jaamacadda ee la heli karo garoonada, dhismayaasha, iyo goobaha sida loo go'aamiyay inay lagama maarmaan u yihiin oo ku habboon adeegsiga ku-meelgaarka ah oo ah ee hoy aan la isugu iman si looga hortagga faafitaanka cudurka COVID-19. Ilaa inta loo arko inay lagama maarmaan u tahay hirgelinta Amarkan, heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee noocaas ah waxaa ka mid noqon kara xarun caafimaad oo gaar loo leeyahay oo ku meelgaar ah oo loo adeegsado sida kuliyaddaha ama dhismayaasha jaamacadeed ee jira, dhismayaasha, iyo goobaha, iyo kuliyad ama jaamacad noocaas ah iyo shaqaalaheeda waxaa loo qaadan doonaa inay fulinayaan waajibaadka dadweynaha iyo xaq u lahaanshaha difaacyada, iyo talaabooyinka ka yimaada, mas'uuliyadda madaniga ee lagu bixiyo R.C. 32743.02, R.C. 2744.02, iyo R.C. 2744.03 oo la xidhiidha isticmaalka xarun caafimaad oo gaar loo leeyahay oo ku meel gaadh ah. Kuliyaddaha dadweynaha iyo jaamacadaha waxaa sidoo kale la sii amaray inay ku soo rogaan xayiraad macquul ah isticmaalka iyo marin u helka hantida iyo goobaha kuliyadaas ama jaamacada, iyadoo la raacayo R.C. 3345.26(C), ayaa loo arkaa inuu lama huraan u yahay hirgalinta Amarkan. Si waafaqsan R.C. 3345.042(C), marka laga reebo kulliyadda bulshada, kulliyadda bulshada ee gobolka, kulliyadda farsamada, ama laanta jaamacadda, hayad waxbarasho heer jaamacadeed iyo shaqaalaheeda, inta ay codsanayaan ama bixinayaan kaalmo ama gargaar iyada oo la raacayo heshiis gargaar wadaagga ah sida ku xusan amaradan, loo arko in ay qabanayaan waajibaadka guud sida lagu qeexay R.C. 2743.01 oo ay leeyihiin difaacyada, iyo kaabayaasha, qaanuunka madaniga ah ee lagu bixiyay R.C. 2743.02 Kuliyaddaha bulshada, Kuliyadda bulshada ee gobolka, kulliyadaha farsamada, laamaha jaamacadaha, iyo shaqaalaha hayadaha noocaas ah, inta ay codsanayaan ama bixiyaan kaalmo ama gargaar sida ku xusan heshiiska gargaarka wadaagga ah ee hoos imaad Amarkan, waxay heli doonaan difaacyada iyo ka caabinta mas'uuliyadda madaniga ah ee lagu bixiyo R.C. 2744.02, iyo R.C. 2744.03 waxayna xaq u yeelan doontaa dhammaan xaddidaadaha lagu dabaqi karo magdhawga dib loo soo celin karo ee hoos yimaada R.C. 2744.05. Ma jiro wax Amarkan ah oo ka hor istaagaya kuliyaddaha Ohio ama kuwa gaarka loo leeyahay inay la shaqeeyaan Ohio EMA iyo/ama maamulada maxalliga ah si ay u bixiyaan hoy aan la isugu iman haddii loo baahdo. Waxay geli karaan heshiisyada gargaarka wadaagga ah ee ku xusan qaybta 5502.30 ee Xeerka Dib loo

Eegay. Amarkani waa inuu si dhaqso leh u dhaqan galaa wuxuuna uu sii socon doonaa si buuxda oo wuxuu ku dhammaan doonaa boqol iyo labaatan(120) maalmood ka dib ama waqti uu go'aamiyo Agaasimaha Caafimaadka, hadba kii soo hor mara.

_____ Maarso 31, 2020____

Amy Acton, MD, MPH
Agaasimaha Caafimaadka